

## **SOMALI**

### **FREE TO AIR 2009**

#### **Pt. 1/4**

#### **Xoriyada Hadalka**

Badhigyo isdaba socda ayaa ka dhici doona qeybaha London mudo dhan afar sano, *Free to Air* waxay ku bilaabanaysaa oraahdii caanka ahayd Roosevelt 'afarta xoriyadood' – xoriyada hadalka, xoriyada diinta, xoriyada rabitaanka iyo xoriyada cabisda - waxayna qeexaysaa micnaha badan ee 'xoriyada' marka lagu dabaqo bulshada waqtigan.

Sanadka kasta gudi cusub ayaa ku soo bandhiga bandhigyo laba xarumood oo London ah, iyadoo ay la socoto barnaamijyo kala duwan oo isugu jira xaflado, shirar iyo kulamo lagu soo bandhigayo xaafadaha London.

*Free to Air* 2009 wuxuu xooga saarayaa xoriyada hadalka iyo xoriyada cabiraada taasoo la eegayo sidii xoriyadahaas loogu halgamay caalamka, inay ahaato mid haystaan dhamaan dadka, iyo wiliba sida dadka fikradhooda loo siin lahaa fursad lagu maqlo.

Barnaamijka sanadkan wuxuu diirada saarayaa hawlaha muuqaalka socda oo ay Suki Chan ku soo bandhigayso 198 Contemporary Arts & Learning and A Foundation, oo ah barnaamij falanqaynaya sida fanaanada ay filimada uga qayb qaateen cabirida xoriyada iyadoo adeegsanaya filimada iyo fiidiyowga iyo hadaladooda, iyo barnaamij ay soo saareen laba fanaan oo ku nool kana shaqeeya London.

*Free to Air*, waa Dalad Film iyo Fiidiyow oo ay maalgaliyeen Degmooyinka London isla markaana la soo saaray iyadoo lala kaashanayo Foundation and 198 Contemporary Arts & Learning, London.

BANDHIGA

### **Suki Chan Socod Hurdeedka, Hadal Hurdeedka**

A Foundation, London (Banaanka lagu soo bandhigayo)

Khamiis 10 – Sabti 12/09/2009

198 Contemporary Arts & Learning (rakibida shaashada-mataanaha)

Isniin 14/09/2009 – 19/10/2009

Nalalka London ee ee iljabinaya iyo gawaarida xooga ku socda, halkaasoo gawaarida iyo tareenada ay ku dhaafayaan iftiin habeenkii, iyo halka dadka ay ku fakarayaan xoriyada magaalada, ama ay magangalyo ka raadsanayaan hawl maalmeedka soo noqnoqda iyo xaaladaha lagu qasban yahay. Iyadoo ku dayanaysa fikrada cabirada xoriyada ee bulshada waqtigan, Suki Chan' fiidiyowgeeda cusub ee la rakibayo waa daraasad cajiib ah oo ka tarjumaya dadwaynaha London ee kala duwan. Chan waxay eegaysaa dhaqdhaqaaqa dadwaynaha markay u socdaan ama ka yimaadaan shaqada iyagoo ku raaxaysanaya xiliga firaaqada ah – iyagoo koox-koox habeenkii u baxaya, sheekaysanaya iyo waardiyayaal – si ay u falanqeeyaan sida aan u samaysano hawada khusuusiga ah iyo nafsiga ah ee ka baxsan xadaynta dhismayaasha iyo qaabka dhaqanka ay ku qasabtay nolosha magaalada.

Warbixin dheeraad ah oo ku saabsan Free to Air fadlan kala soo xiriiri

### **Film and Video Umbrella**

8 Vine Yard

London

SE1 1QL

T 020 7407 7755

[www.fvu.co.uk](http://www.fvu.co.uk)

[fta@fvu.co.uk](mailto:fta@fvu.co.uk)